Department of Health

# Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan FGM

More information about FGM (Somali)

Gudniinta Dumarka (Female Genital Mutilation (FGM)) waa nidaam kaasoo xubnaha taranka dumarka la dhaawacayo ama la baddalayo, laakiin ma jiraan sababo caafimaad oo tan ku saabsan. Waxay si aad u daran u dhaawici kartaa caafimaadka gabdhaha ee waqtiga dheer. Qaar gabdhaha ah waxay u dhintaan dhiig bax ama cudur ka dhasha ee si toos ah maxsuulka nidaamkan uga yimaada. Dumarka lagu sameeyay FGM waxay kala kulmi karaan dhibaato ilmo-dhallidda.

FGM waxaa caadiyan lagu sameeyaa gabdhaha da'doodu u dhaxayso 5 iyo 10. Waxaa loo yaqaan gudniinka dumarka, jaridda ama erayda kale sida sunna, gudniin, halalays, tahur, megrez iyo khitan iyo magacyo kale.

## Noocyada FGM:

Nooca 1 – xaaqidda qaar ama dhammaan cadadka- clitoris

Nooca 2 – xaaqidda qaar ama dhammaan ee labadaba cadadka iyo qayb yar oo faruuryaha -labia ah (faruuryaha "lips" ee ku wareegsan xubinta -vagina).

Nooca 3 – xaaqidda qaar ama dhammaan xubinta taranka dumarka, ay ku jiraan cadadka. Isku tolidda geesaha si loogu dhaafo duleel yar.

Nooca 4 – dhammaan noocyada kale ee xanuunka, ay ku jirto jaridda, gubidda, isku-qaloocin, isku-dhisid iyo isku-qaloocin xubnaha taranka dumarka.

## Sababtee ayuu FGM u dhacaa?

Waxaa caadiyan u habeeya gabadha waalidkeed ama qoyskeeda in lagu sameeyo FGM. Sababaha loo sameeyo waxaa ka mid ah:

- caado ahaan
- diin ahaan
- dhaqan ilaalin
- bikro ilaalin
- nadaafad ahaan
- dhawridda sharafta qoyska
- bulshada oo aqbashay, gaar ahaan tan la xiriirta guurka

Sababahani ee FGM waxay ku salaysan yihiin faham-darri ama ku baraarug la'aan.

Qaar waxay aaminsan yihiin in FGM loogu baahan yihiin ka qayb ahaan diintooda, tusaale ahaan Nooca 1 FGM ayaa mararka qaar waxaa si qalad ah loogu yeeraa *sunna*. Laakiin ma jiraan rqoraalo diini ah kuwaasoo taageeraya FGM ama sheegaya in la sameeyo.

## FGM waa sharci-darro

FGM waa sharci-darro waana inaan **weligeed** lagu samayn ama halkan amaba dibadda. Sidoo kalena waa sharci-darro in lagu caawiyo qof kale samaynta FGM si kastaba. Qof kasta ee lagu helo samaynta arrintan wuxuu wajahayaa 14 sano oo xabsi ah in lagu ganaaxo (lana bixin karo ganaax lacageed).

## FGM wuxuu keenayaa dhibaato aad u daran caafimaadkaaga

FGM wuxuu ku keenaa dhibaato aad u daran gabdhaha iyo haweenka, ay ku jiraan:

- xanuun joogto ah
- cudurro soo noqnoqda oo ka dhasha kuwaasoo keeni kara dhalmo la'aan
- dhiig bax, soo buurnaan dheecaan leh iyo isku urur xanuun leh
- dhibaatooyin gaadi soo bixidda ama gaadi ceshi la'aan
- isku-buuq, xasuusasho, is-dhibaatayn
- dhibaatooyin dhalmada/ilmo-dhalidda kuwaasoo keeni kara dhimasho

## Maxaad caawinaad heli kartaa?

Haddii lagugu sameeyay FGM, waxaad caawinaad caafimaad iyo taageero ka heli kartaa GP-gaaga iyo xirfadlayaasha daryeel-caafimaad ee kale. Waxaad caawinaad ka heli kartaa umilisadaada haddii aad uur leedahay.

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa faahfaahinaha xarumaha iyo adeegyada ku takhasusay FGM bogga www.nhs.uk/fgm.

**Haddii aad ka walaacsan tahay gabar khatar ugu jiri kartaa FGM, u sheeg xirfadlaha caafimaad ee ku daaweeya ama wac khadka-caawinta NSPCC 0800 028 3550, 24saac maalintii.**

**Haddii aad ka walwalsan tahay in qoyskaagu ama bulshadu cadaadis kugu saarto samaynta FGM ee lagu fuliyo gabadhaada, waydii caawinaad GP-gaaga, booqdaha caafimaad ama wixii kale ee xirfadle daryeel-caafimaad ah.**

## Baasaboorka Caafimaadka

Waxaad waydiin kartaa nuqullo ku saabsan '*Warbixin ka soo horjeeda Gudniinka Dumarka*'. Tani waa warbixin daabacan oo cabbir buug jeeb la gelin karo ah, lagu helayo 11 luuqadood taasoo aad u qaadan karto markii aad dibadda aadayso. Waxaad tusi kartaa qoyskaaga. Waxay caddaynaysaa in FGM uu dambi aad u daran yahay waddanka UK.

## Ka soo aruurinta iyo isticmaalidda macluumaad bukaanno lagu sameeyay FGM

Muuqaal-elektorooniik NHS waxay aruurinaysaa macluumaad ku saabsan Gudniinka Dumarka - FGM ee England iyagoo matalaya Wasaaradda Caafimaadka iyo NHS England. Maluumaad aruurintan waxaa lagu magacaabaa Maluumaadd-iswata ee la Hagaajiyay ee (FGM Enhanced Dataset) – www.content.digital.nhs.uk/fgm. Maluumaadka la aruuryay waxaa loo isticmaalay soo saaridda macluumaad caawinaya sida NHS ay u daryeelayso dumarka iyo gabdhaha lagu sameeyay ama khatar ugu jira FGM.

Muuqaal-elektorooniik NHS waxay aruurinaysaa qaar 'xog-xajisan ee macluumaad qofeed' ee kugu saabsan sida magacaaga, taariikhda dhalashada, lambarka NHS iyo waddanka asal ahaaneed. Waxaa sidoo kale la aruurinayaa macluumaad u gaar ah FGM. Tani waxaa ka mid ah nooca FGM, da'daada intii ay ahayd waqtigii lagu sameeyay FGM, waddanka lagaaga sameeyay FGM iyo taariikhda qoys ee FGM.

Dhakhtarada Guud - GPs iyo bixiyeyaasha kale ee daryeel-caafimaad waxaa sharci ahaan laga doonayaa inay macluumaadkan u soo gudbiyaan Macluumaad-elekorooniik NHS, hase yeeshee waad diidi kartaa in xog-xajisan ee macluumaadkaaga qofeed la wadaago. Waxaad kala hadli kartaa xirfadlahaaga caafimaad sida tan loo samaynayo. Ama oggaanshaha wax badan ee ku saabsan sida loo isticmaalo xogtaada loona maareeyo, ay ka mid tahay sida Macluumaad-elektorooniik u dhawrayso xog-xajinta macluumaadka, iyo iska-diiwaangelinta wixii diidmo ah fadlan eeg:

www.content.digital.nhs.uk/patientconf

**Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan FGM, fadlan eeg www.nhs.uk/fgm**

© Xuquuqda daabacaadda Crown 2016

2905951 - Somali 11/16

Produced by Williams Lea for the Department of Health

www.dh.gov.uk/publications